



Countywide Planning Policies

Transportation



Dulmarka

Cutubka Transportation (Gaadiidka) ee **Countywide Planning Policies** (CPPs, Xeerarka Qorshaynta ee Degmada oo Dhan) wuxuu ku hagaa maamulada inay abuuraan khadka gaadiidka oo waxtar badan, la isku halayn karo, amaan ah, iskuna dhafan si dadka iyo badeecoyinku iskugu gooshaan heer gobal iyo heer deegaan.

Higsiyada iyo xeerarka cusub ee cutubkaan ku jira ayaa ku dhisan xeerarka horay u jiray ee gobalka iyo degmada oo dhan waxayna kala yihin sadex qaybood:

- Taageerida Kobaca – in diirada la saaro u adeeggida gobalka oo leh nidaamka gaadiidka oo sii balaarinaya Regional Growth Strategy (Xeelada Kobaca ee Gobalka).
- Isku socodka – wax ka qabashada cabirkha buuxa ee qaababka gaadiidka muhiimka u ah in dadka iyo badeecoyinku iskaga dhex gooshaan gobalka iyo meelaha kasii shisheeya.
- Shaqooyinka Nidaamka – isku dubaridka naqshada, dayactirka, iyo shaqada nidaamka gaadiidka si loo adkeeyo badqabka, waxtarka, iyo adkaysiga.

Isbadelada Xeerka

Isbadalada lasoo jeedshay in lagu sameeyo cutubka Transportation waxaa diirada lagu saarayaa in la waafaqo isbadalada xeerka gobalka iyo sharciga gobalka, iyo in dhextaal looga dhigo sinaanta dhammaan nidaamka gaadiidka ee Degmada.

Isbadalada lasoo jeediyay ayaa wax ka qabanaaya sinaanta ayadoo muhiimada la saaraayo adeegyada gaadiidka iyo isku socodka meesha loogu baahi badan yahay ayadoo diirada la saaraayo dadka Black, Indigenous, and people of color (Madoowga ah, Asaliyiinta, iyo dadka aan cadaanka ahayn), dadka danyarta ah ama aan waxba hayasan, iyo dadka baahiyaha gaarka ah ee gaadiidka qaba.

Isbadaladeena lasoo jeedshay ayaa muhiimada siinaaya abuurista isticmaalada dhulka oo taageeraaya gaadiidka, dhiiri gelinaaya gaadiid shaqaynaaya, yaraynaayana barakaca iyo saamaynada xun ee gaara bulshooyinka ay saameeyaan hormarinta lagu sameeyo gaadiidka.

Si guud, isbadalada lasoo jeediyay ayaa taageeraaya xeelada kobaca ee VISION 2050 (HIGSIGA 2050) waxayna u diyaarshaan maamulada maxaliga ah si loo buuxsho baahiyaha gaadiidka ee kobaca la qiyaasaayo ee bulshada iyo shaqada labadaba.

Saamaynnada Isbadelada Xeerka

- Waxay adkaysaa abuurista nidaam gaadiid oo loo siman yahay.
- Waxay kor u qaadaa badqabka nidaamka gaadiidka ee dhammaan isticmaalayaasha.
- Waxay dhiiri gelisaa qaabab kale oo qofku keligiis gaadiid ku wadan karo ayna ku jiraan taraasiidka iyo gaadiidka shaqaynaaya.
- Waxay yaraysaa barakaca iyo saamaynta ay ku leedahay bulshooyinka.
- Waxay xoojisaa xariirada u dhhexeeya isticmaalka dhulka iyo gaadiidka.
- Waxay kor u qaadaa nidaamka gaadiidka ee bii'ada u roon ayadoo la dhiiri gelinaayo isticmaalka gaadiidka waawayn, iyo kuwa jimsiga iyo waxyaabo badal u ah shidaalka.

Waxaan U baahan Nahay Fikirkaaga!

Haddii aad doonayso inaad faallo guud bixiso, aad su'aalo ka qabto CPP ama maaraynta kobaca, ama doonayso inaad door ku yeelato, fadlan iimeel u dir gmpc@kingcounty.gov ama la xariir Ben Larson adoo wacaaya (206) 263-9560.

Waa maxay Countywide Planning Policies?

Countywide Planning Policies ama CPP waa taxanayaalka xeerar maamula ciladaha maaraynta kobaca ee Degmada King. Growth Management Planning Council (GMPC, Golaha Qorshaynta Maamulka Kobaca) ayaa isku keena saraakiisha la doorto ee ka socda Degmada King iyo magaalooyinka iyo maamulada hoostaga si loo abuuro xeerarka CPP.

CPP waxay bixiyaan higsiga wadanka oo dhan waana naqshada Degmada King iyo magaalo kasta oo King ka tirsan u adeegsadaan abuurista qorshaheeda gaarka ah ee balaaran, kaasoo ay qasab tahay inuu waafaqsan yahay CPP iyo [VISION 2050](#).

Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan CPP, Qorshayaasha Waawayn, iyo xogta kale ee la xariirta maaraynta kobaca, fadlan booqo bogga Degmada King ee Regional Planning (Qorshaynta Gobalka) adoo gujinaaya [lifaaqaan](#).